



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA MAARSO 2024



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Maarso 2024 ayaa gaaray 145.34, marka la barbardhigo 142.14 bishii Febraayo 2023.

Isbedel bileedka, Maarso 2024, marka la barbar dhigo Febraayo 2024, ayaa sare u kacay 2.25 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa qiimaha Dharka & Kabaha 25.85 boqolkiiba iyo Maqaayadaha & Hoteelada +3.78 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa inta badan ka yimid qiima kororka dharka 25.85 boqolkiiba. Qiimaha kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka Caruurta 71.97 boqolkiiba dabaaldaga Ciidul Fidirga aawaded. Sare u kaca ku yimid Maqaayadaha & Hoteelada ayaa ka yimid qiimaha Hoteelada 5.77 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Maarso 2023 iyo Maarso 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.86 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.65 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Febraayo 2023 iyo Febraayo 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maarso 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Febraayo 2024	
Tusaha bishan (Maarso 2024)	145.34
Tusaha bishii hore (Febraayo 2023)	142.14
Tusaha sanadkii hore (Maarso 2023)	137.29
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	2.25%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.86%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maarso 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Maarso 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maarso 2024

Heerka sicir-bararka bisha Maarso 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2023 iyo Maarso 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.86 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2023 iyo Maarso 2024, marka labar bardhigo 5.65 boqolkiiba 12kii bilood, Febraayo 2023 iyo Febraayo 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Maarso 2024 ayaa sameeyey sare u kac dhan 2.25 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maarso 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 1.32 boqolkiiba, bishii Maarso 2024 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -0.07 boqolkiiba bishii Febraayo 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -2.04 boqolkiiba bishii Maarso 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.08 boqolkiiba Febraayo 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sare u kac bille ah sameeyey 0.03 boqolkiiba ee Maarso 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 8.88 boqolkiiba Maarso 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 12.51 boqolkiiba ee Febraayo 2024.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maarso 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maarso 2024(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 61.87 boqolkiiba bishii Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+94.60 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 39.60 boqolkiiba Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+40.20 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+37.5 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.60 boqolkiiba bishii Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+30.61 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa sababay qiimaha rakabka gawarida dhulka (+45.11 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 8.88 boqolkiiba bishii Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kirada (+19.40 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 8.79 boqolkiib bishii Maarso 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (+9.70 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto Dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 7.10 boqolkiiba bishii Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+11.10 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 6.47 boqolkiiba Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+14.65 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Maarso 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia


- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah 5.71 boqolkiiba, bishii Maarso 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+18.52 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 3.97 boqolkiiba Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+10.46 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Maarso 2024(-)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sanadlaha ahi hoos u dhacay -2.09 boqolkiiba, bishii Maarso 2024, sare u kaca ayaa ka yimid qiimaha cuntada -1.99 boqolkiiba. Sababta, sare u kac ku yimid qiimaha rootiga & badarka oo gaaray -6.85 boqolkiiba.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maarso 2024 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Maarso 2024(+)

- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac Bille ah oo dhan 25.85 boqolkiiba Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+21.90 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+71.97 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac Bille 3.78 boqolkiiba bishii Maarso 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+5.77 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- Ma jirin hoos u dhac muuqda ee Maarso.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Maarso 2024 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maarso 2023 TSB	Febraayo 2024 TSB	Maarso 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha TSB	100.00	137.29	142.14	145.34	2.25	5.86
Cuntada & Cabitaanada	46.04	145.61	140.78	142.63	1.32	-2.04
Tubaakadda	1.25	159.76	173.80	173.80	0.00	8.79
Dharka & Kabaha	5.03	152.13	168.74	212.37	25.85	39.60
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	128.62	140.00	140.03	0.03	8.88
Agabka Guryaha	2.93	114.74	118.73	119.30	0.48	3.97
Caafimaadka	5.00	172.91	182.78	182.78	0.00	5.71
Gaadiidka	3.77	109.51	119.73	120.03	0.25	9.60
Isgaarsiinta	2.80	103.03	166.78	166.78	0.00	61.87
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	150.45	156.13	3.78	7.10
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	114.03	121.41	121.41	0.00	6.47

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Abriil, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Maajo, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Maarso 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maarso 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Maarso 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia